



Liiska hubinta wajiga 2aad

Caafimaadka iyo Amniga


Hubso in aad bixiso jawi shaqo oo badbaado leh oo aad wacyi geliso shaqaalaha adeegga guriga wixii ku saabsan calaamadaha, astaamaha, iyo qodobbada halista ee la xiriira cudurka COVID-19, iyo sida looga hortago faafitaanka coronavirus-ka ee shaqada. Macluumaadkaani waa inuu ku jiraa tillaabooyinka lagu qaadayo goobta shaqada si bulshadu u kale dheraato, gacmo-dhaqid joogto ah, iyo taxaddarro kale, oo lagu bixiyo luqadda uu shaqaaluhu si wanaagsan u fahmo. Booqo bogga www.kingcounty.gov/covid to si aad uga hesho hagista caafimaadka dadweyne in kabadan 30 luqadood.




Hubi in shaqaaluhu joogteeyaan in ay isu jirsadaan lix fiit. Hadeysan taasi suurta gal aheyn, waxaad ka yareysa jadwalka shaqada ama waxaad shaqaalaha u dhaxeysisaa wax kala qeybiya.



Bixi oo sii shaqaalaha marada daboosha snaka iyo afka iyo gacngashi la tuuri karo marka la isticmaalo. Booqo seattle.gov/mayor/covid-19/seattle-protects




Hubso in aad gacmaha si isdabjoog ah u dhaqidid.



U xilsaar kormeere COVID-19 wakhti/xili kasta oo shaqo isgoo howshiisu tahay kormeerida caafimaadka iyo badbaadada shaqaalaha uuna hubiyo nadaafada saxda ah, iyo in la raacay nidaamka baarista.




Samee oo baar heerkul ah shaqaalaha ee astaamaha COVID-19 mar kasta uu soo galayo shaqada. Haddii shaqaale uu ka muuqdo astaamo, u diro guriga isla markaaba oo si qoto dheer u nadiifi aagagga / sagxadaha uu shaqaaluhu taabtay.



Soo dhaji macluumaadka badbaadada e COVID-19 iyo shuruudaha muuqaalka la arki karo.


PHASE 2 LIISKA HUBINTA EE DUKANKA TAFARIIQDA




Meesha ugu horeysa ee meherada lag soo galo waa in ay ahataa albaabka hore lana xaddido gelitaanka albaabada dambe ama meelaha kale ee laga soo galo. Haddii albaabka hore laga soo galo waayo, u oggolow marin kale ee laga soo galo.

Caafimaadka iyo Amniga Macmiilka

Muuji tilmaamaha caafimaadka guud ee ugu dambeeyay ee luuqadaha badan ee ku saabsan goobtaada. Caafimaadka Dadweynaha - Seattle & King County waxaad ka soo degsan kartaa buustrada darbiga lagu dhajiyo in ka badan 30 luqadood oo bilaash ah oo barta laga heli karo iyo oo bilaasha ah www.kingcounty.gov/covid.




Calamadee oo u dhexeysi musaafu lix fiit ah gudaha iyo banaanka dhismaha haddii sugidda ay badan tahay; una xilsaar shaqaale si uu u maareeyo socodka macaamiisha.




Calaamad ku muuji kala foganshaha bulshada iyo shuruudaha iyo tirade loo ogolyahay in ay dukaanka ku jiraan.an.




Si joogto ah u nadiifi una nadiifi aagagga meelaha sare oo la isticmaalo, musqulaha, iyo aalad kasta oo ay adeegsadaan shaqaalaha.



Hadday suurogal tahay, u samee saacado loogu tala galay shaqsiyaadka halista ugu sarreysa qaba oo keli ah.




Qolalka dharka la isgu tijaabiyo waa in la nadiifiyaa mar kasta oo la isticmaal.



Alaab kasta oo aan la gadan oo looga tagat qolka isku eegida waa in meesha laga qaado oo la kaydiyaa wax aan ka yarayn 24 saacadood ka hor intaan lagu soo celin meesha dharka la suro.

PHASE 2 LIISKA HUBINTA EE DUKANKA TAFARIIQDA



Tixgeli in macamiishu ay aad rabitaan kood ku ogoladan in ay qoraan magaca, telfoonk numbarka, iyo maalinta ay soo booqdeen meheradaada si ay kaaga caawiso fududeynta raadintooda.

Waad ku mahadsan tahay iskaashigaaga!